



Digniin ku saabsan cudurka Mumps(qanjir barar)
Ogeysiis Muhiim ah oo ku socda Waalidka iyo Masuulka
February 9, 2017

Maamulka dugsiga wuxuu jeclaan lahaa in u idin ogaysiyo arin ku saabsan kororka xaaladaha mumps(**qanjir barar ama qaamo-qashiir**) ee Colorado. Laga bilaabo February 8, waxaa jiray 27 kiis oo mumps ah ee gobolka Colorado, waxaana la filayaa in tiradu kor u sii kacdo. Si loo yareeyo faafitaanka mumpska ee dugsiyada, Waaxda Colorado ee Caafimaadka Dadweynaha iyo Deegaanka ayaa naga codsaday in aan gudbino macluumaadka soo socda.

Mumps (**qanjir barar ama qaamo-qashiir**) waa cudur fayrasku keeno oo xanuun leh bararna ku keena qanjidhada dhareerka, xummad-hoose, iyo madax xanuun. Caadi ahaan, dadka qaba mumpska waxaa barara qanjirka Parotidka ee ku yaala agagaarka dhabanka ee u dhow dhegta iyo dhinaca dambe ee daanka. Dadka qaar ee qaba cudurka mumpska ma laha wax calaamado ah haba yaraatee. dhibaatooyinka halista ah ee mumpska ma badna oo waa dhif, laakiin waxaa jiri kara barar maskaxda, caabuq iyo barar ku dhaca ugxanta ama xiniinyaha, ama dhago beel.

Mumpska wuxuu ku faafaa qufaca iyo hindhisada ama haday ku soo gaarto candhuufta qofka qaba cudurka, iyo sida wadaaga koob ama maacuunta cuntada. Calaamadaha mumpska sida caadiga ah waxey soo baxaan 16 ilaa 18 maalmood ka dib markii aad la kulanto qof qaba cudurka mumpska. Dadka qaba mumpska waxey faafin karaan fayraska 2 maalmood ka hor ilaa 5 maalmood ka dib marka u qanjirku yeesho barar.

Fadlan la xiriir dhakhtarka ilmahaaga haddii ilmahaagu uu yeesho barar mid ka mid ah qanjidhada ku wareegsan dhegaha ama qoorta. Haddii dhakhtarku cadeeyo in ilmahaagu qabo mumps,(qanjir barar-qaamo-qashiir) isaga /ama iyada waa laga baari karaa mumps(qanjir barar) waana in ay guriga joogaan 5 maalmood ka dib marka uu bilaabmo qanjir bararka .

Dhammaan ardayda (kindergartenka ilaa fasalka 12aad) waxaa looga baahan yahay in ay leeyihiin talaal sax ah ee Jadeecada, tallaalka Mumps, Rubella (MMR) ee gelitaanka dugsiga, haddii aaney haysan warqad loga dhaafay tallaalka oo ku jirta faylkiisa. Tallaalka MMR waxaa inta badan la siiyaa da'da 12-15 bilood jir, qaybata kalena waxa la siiyeyaa marka ay galayaan dugsiyada (4-6 sano). Dadka dhashay ka hor 1957 sida ay u badan tahay cudurka mumps (qanjir barar ama qaamo-qashiirka) wuu ku soo dhacay oo jirkakooda ayaa difaac badan leh .

Fadlan dib u fiiri diiwaanka tallaalka ilmahaaga si aad u hubiso in ilmahaagu leeyahay tirada saxda ah ee tallaalka MMR (1 tallaal inta aan ilmaha dugsiga galin ka hor iyo 2 tallaal xanaanada ilaa jaamicada). Haddii aad u baahan tahay kaalmo helidda diiwaanka tallaalka ilmahaaga, la xiriir dhakhtarka caafimaadka ee ilmahaaga ama wac waaxda macluumaadka Tallaalka colorado ee 303-692-2437 ama 1-888-611-9918. La xiriir dhakhtarka caafimaadka ee ilmahaaga ama waaxda caafimaadka ee degmadaada haddii ilmahaagu u baahan yahay tallaalka MMR ah.

Dadka qaatay tallaalka MMR ah qiyaas laba jeer, waxey sagaal jeer ka yar tahay in uu ku dhaco mumps (qanjir barar ama qaamo-qashiir) dadka aan la tallaalin. Si kastaba ha ahaatee, dadka iska tallaalay MMR qiyaas laba jeer, weli wuu ku dhici kartaa mumps, gaar ahaan haddii ay mudo dheer, ama xiriir dhow la leeyihiin qof qaba cudurka. Waana ka xanuun yar yahay qof aan la tallaalin.

Haddii mumps(qanjir barar ama qaamo-qashiir) uu saameeyay dugsigaaga iyo ilmahaaga oo aan si haboon loo tallaalin, isaga /ama iyada waxaa dhici karta in dugsiga 25 maalmood ama in ka badan laga reebo waxeyna ku xirantahay hadba inta qof ee qabta ama qaaday cudurka mumps (qanjir barar ama qaamo – qashiir) ee dugsiga.

SOMALI



SOMALI

